# Warbixinta waalidka/mas'uuliyiinta ardayda iyo carruurta ee baaritaanka Ungdata junior ee Bydel Alna i Oslo 2018-ka

2018 –ka waxaa la qabanayaa baaritaanka Ungdata junior kaas oo degmada Bydel Alna i Oslo loogu qaban doono ardayda fasallada 5.-7-aad.

Baaritaanku wuxuu u kuurgelayaa meelaha ugu muhiimsan nolosha carruurta. Ujeeddadu waa in aqoon dheeri ah loo yeesho sida ay tahay in carruur lagu ahaado degmada – sida ay xaaladda carruurtu tahay iyo waxyaalaha ay qabtaan wakhtiga ay firaaqada yihiin. Natiijada baaritaanka waxaa loo isticmaalayaa hawlaha ay degmadu u qabanayso carruurta da'daan iyo cilmibaaris.

Baaritaanku wuxuu dhacayaa inta iskoolka la joogo iyaga oo ay carruurtu ka jawaabi doonaan foom su'aalo oo elegtaroonig ah. **Baaritaanku wuxuu dhacayaa toddobaadyada 23 - 24.**

Baaritaanku wuxuu u dhacayaa **si uu aqoonsiga qofku qarsoon yahay**, sidaas darteedna suurtaggal ma ah in ardayga gaarka ah laga dhex garto macluumaadka la soo aruuriyo. Qof gaar ah lagama dhex garan doono marka la soo bandhigo natiijada baaritaanka. Qofka la weydiin maayo magac ama waxyaalo kale oo qofka lagu aqoonsado.

**Xor baa loo yahay in baaritaanka laga qaybqaato iyo in kale.** Ilmuhuna xor buu u yahay in uu ka qaybqaato iyo in kale. Waalidka/mas'uuliyiinta ardaygu way ka reebi karaan carruurtooda in ay ka qaybqaataan. Waxayna taas samaynayaan iyaga oo la xiriiraya macallinka xiriiriyaha ah. Dadka baaritaanka ka jawaabaya haddii ay doonaan way ka boodi karaan su'aalaha qaarkood, ama baaritaanka ayay ka hari karaan iyaga oo joojinaya in ay ka jawaabaan foomka su'aalaha.

Foomka su'aalaha waxaa ku qoran su'aalo ku saabsan waxyaalaha ay carruurtu qabtaan marka ay fasaxa yihiin, sida ay iskoolka u arkaan iyo sida ay xaaladdoodu tahay. Wuxuu baaritaanku jawaab ka bixinayaa sida ay carruurtu maqsuudka uga yihiin aagga ay ku nool yihiin, saaxiibbada, waalidka iyo guud ahaan nolosha. Mawduucyada baaritaanka ugu waaweyn waa saaxiibbada, iskoolka, wakhtiga firaaqada la yahay, isticmaalka saxaafadda, caafimaadka, tayada nolosha, cayda, qoys iyo guri. Waalidka/mas'uuliyiinta ardayda ee doonaya waxaa loo soo diri karaa foomka su'aalaha oo dhan. Ciddii taas doonaysa ha la xiriirto Kompetansesenter rus - Oslo (KoRus - Oslo).

Ka qaybqaadashadu waxay dhacaysaa iyada oo ay carruurtu bogga http://www.svar-ungdata.com ku gelayaan lambar/xarfo hal mar shaqaynaya oo loo qaybin doono dadka baaritaanka ka qaybqaadanaya. Lambarka/xarfaha halka mar shaqaynaya laguma garan karo qofka jawaabaha bixiyay. Lambarka/xarfaha halka mar shaqaynaya waxaa loo isticmaalayaa si loo hubiyo in ay ka qaybqaataan keliya kuwa baaritaanka ku jira.

Si uu baaritaanku sawir sax ah uga bixiyo xaaladda Bydel Alna i Oslo waxaa muhiim ah in ay ka qaybqaataan dadka ugu badan ee suurtaggalka ah. Tani waa fursad ay carruurta degmada Bydel Alna i Oslo u leeyihiin in ay siyaasiyiinta, mas'uuliyiinta iyo cilmibaarayaashaba ugu sheegaan xaaladda noloshooda.

Macluumaadka waxaa lagu xaraynayaa kaydka macluumaadka qaranka, iyada oo halkaas lagula xarayn doono baaritaannada carruuraha ee kuwan la midka ah ee degmooyinka kale.

Baaritaanka waxaa fulinaya machadka cilmibaarista NOVA ee OsloMet – jaamacadda magaalada (horay loo oran jiray Høgskolen i Oslo og Akershus) iyo KoRus - Oslo iyaga oo shaqada u qabanaya degmada Bydel Alna i Oslo.

Haddii aad qabto su'aalo baaritaanka la xiriira, la xiriir fagkoordinator Yvonne Larsen ee KoRus - Oslo (908 14 334/ yvonne.larsen@vel.oslo.kommune.no), ama xiriiriyaha baaritaanka ee degmada Bydel Alna i Oslo enhetsleder, enhet kultur, møteplasser og frivillighet Carl-Fredrik Sandkroken-Olafsen (907 16 512 /carl-fredrik.olafsen@bal.oslo.kommune.no).

Mahadsanidiin

| | | |
|---|---|---|
| Henning Pedersen | Hanne C. Hougen | Ellen Liljedahl |
| Seksjonssjef | Madaxa xoghaynta Ungdata | Avdelingsdirektør Oppvekst og lokalsamfunn |
| KoRus - Oslo | NOVA | Degmada Bydel Alna |